



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Abril 29, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Liiska kala doorashada maalgelinta

Maarso 11, 2021, Madaxweyne Biden ayaa saxiixay Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka (ARPA) oo noqday mid sharci ah, sameynta xirmada gargaarka COVID-19 oo ballaaran oo gaaraysa \$1.9 trillion. Xeerka waxaa ka mid ah tiro xeerar ah oo si weyn u saameyn doona siyaasadaha daryeelka caafimaadka ee gobolka iyo federaalka, oo ay ku jiraan maalgelinta federaalka oo kor loo qaaday oo loogu talagalay ku bixinta Medicaid gobolka ee la xiriirta guriga iyo adeegyada bulshada ku saleysan (HCBS).

Xeerka Qorshaha Samata-bixinta Maraykanka wuxuu gobolada siiyaa hal sano oo ah, dhibco dhan 10 boqolkiiba oo lagu kordhiyo boqolkiiba taageerada caafimaad ee federaalka (FMAP). Tani waxay keenaysaa, qoondayn hal waqti ah oo qiyaastii dhan \$160 milyan oo loogu talagalay ODDS.

Sharci-dejinta Oregon ayaa ODDS iyo barnaamijyada kale ee leh maalgelinta HCBS ka codsatay in ay dejiyaan liiska kala doorashada oo loogu talagalay maalgelintan dheeraadka ah, halka waqti ah.

Inta la aqoonsanayo liiska, ODDS waxay ku shaqeysay mabaa'diida soo socota.

- Waxyaabaha u faa'iideyn doona Shaqaalaha I/DD

- Waxyaabaha wanaajin doona noloshada dadka iyo bulshooyinka uu saameeyay cudurka COVID-19
- Waxyaabaha waqtigoodu kooban yahay, codsiyada halka waqti ah
- Codsiyada waafaqsan u sinnaanshaha adeega

ODDS waxay talooyin ka raadsaday shaqaalaha iyo daneeyayaasha, oo ay ku jiraan dadka u dooda naftooda, qoysaska, iyo daryeel bixiyayaasha, iyo xubnaha ka tirsan Guddiga Tala bixinta Aragtida, hay'adaha maamulka kiiska, si loo abuuro liiska codsiyada. Waxaan sidoo kale isku duba ridnay barnaamijyo kale sida Dadka Waayeelka & Naafada ah iyo Daryeelka Carruurta. Liixka buuxa ee loo gudbiyay Sharci-dejinta Oregon waxaa laga helayaa [internet-ka](#) mudnaantana looma siin sida ay u soo kala horreeyaan.

Dhowr waxyaabood oo muhiim ah oo ay ku jiraan:

- Dib u soo celinta awooda barnaamijyada uu sida adag u saameeyay COVID-19, sida shaqada iyo taageerada hawlaha maalintii
- Dhisida awooda daryeel bixiyayaasha dhaqan ahaan wax khuseeya
- U sinnaanshaha deeqda lacageed
- Dib u soo celinta Fairview Trust
- Kordhinta maalgelinta loogu talagalay shaqaalaha I/DD ee muhiimka ah
- Wanaajinta kaabayaasha

Sharci-dejintu ayaa go'aamin doonta wax dhacaya ee xiga. ODDS ayaa sharci-dejiyayaasha la socodsiiyay in aan weli helin tilmaamaha Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) ee ku saabsan isticmaalka maalgelintani. Iyada oo ku saleysan tilmaamaha CMS, waxyaabaha qaarkood ee ku jira liiska ayay dhici kartaa in wax laga beddelo ama dib loo eego.

Waxaanu rajeynaynaa sii wadida iskaashi lala yeesho daneeyayaasheena. Waanu kula soo socod siin doonaa marka aanu ogaano waxyaabo dheeraad ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.